KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Muqdisho, 11 Jenayo 1975 L. 1 R. 1

**Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**ee ka tirsan madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOBNIIN

### BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 2, Tr. 14 Diceembre 1974 — *Wax ka beddelid Sharciga lagu dhisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.* Bog. 16

SHARCI L. 3, Tr. 5 Jenayo 1975 — *Toosin Qodobka 7aad ee Sharciga L. 17 ee soo baxay 21kii Aprile 1974.* » 17

SHARCI L. 4, Tr. 5 Jenayo 1975 — *Wareejinta Xidhmooyinka Qaranka.* » 18

---

### BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Diseembar 1974, L. 3 — *Xubinta Guddi Degmo.* Bog. 19

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Diseembar 1974, L. 4 — *Maamul Tuulooyin.* » 20

---

Madbacada Dwladda — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Diseembar 1974, L. 5 — *Tuuladda Sarmaanyo lagu daro Maamulka Degmada Taleex.* Bog. 21

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Diseembar 1974, L. 6 — *Maamulka Tuulooyin.* » 23

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 7 Jenayo 1975, L. 7 — *Biilad Qalin ah oo Kacaannimo ee la Siiyey G.le Sare Aadan Xirsi Warsame.* » 24

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 23 Diseembar 1974, L. 8 — *Habka Diiwaan Gelinta Iskaashatooyinka.* » 25

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 29 Diseebar 1974, L. 9 — *Magacaabid G.le Sare Cabdullahi Maxamuud, Xasan Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.* » 28

XEER HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Agosto 1974, L. 10 — *Dhul Qatay Jaalle Maxamuud Sheek Axmed ku fadhiya mq. 650, kuna yaal Muqdisho Xaafadda Wardigley.* » 29

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Nofembre 1974, L. 11 — *Dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, (Libera disponibilità) Jaalle Moxamed Saalim Naasir.* » 31

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Diseembar 1974, L. 12 — *Cad dhul Dawladeed la siiyay Jaalle Maxamed Xaaji Muridi, ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhigley ku fadhiya mq. 670,41.* » 33

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 1 Diseembar 1974, L. 13 — *Dhul Dowladeed loono gacan geliyay (Concessione di libera disponibilità) Jaalle Cabduraxman Xaaji Murshidi ku yaal Muqdisho, Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 600.* » 34

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Diseembar 1974, L. 14 — *Cad Dhul Dowladeed qatay Jaalle Xaaji Yuusuf Cigaal ku yaal Km. 4, Jidka Afgooye kuna fadhiya qm. 3.330 iyo Cad Dhul Dawladeed la siiyay Impresa Sudano e Pizzoglio, ku yaal Km. 4, kuna fadhiya mq. 843.* » 35

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH.


WASAARADDA HAWLAHA GUU, Tr. 29 Diseembar 1974, Beddelaad Naado Dhul — *Cali Weheliye Siyaad. (1)* Bog. 37

WASAARADDA HAWLAHA GUU, Tr. 29 Diseembar 1974, Dirid Naado Dhul — *Muxubba Xasan Cali. (2)* » 37

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 2 Jenayo 1975, Dirid Naado Dhul — *Caasha Maxamed Warsame. (3)* » 38

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 8 Jenayo 1975, Dirid Dhul Jaalle *Xasan Aadan Cabdi. (4)* » 38

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 8 Jenayo 1975, Naado Dhul Jaalle *Xasan Aadan Cabdi. (5)* » 39

**SHARCI L. 4,Tr. 5 Jenayo 1975.**
**Wareejinta Xidhmooyinka Qaranka.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 iyo Sharcigii 1aad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO FULINAAYA Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha 12kii Disembar 1974kii.

ISAGOO OGSON Baahida loo qabo in Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa loo wareejiyo maamulka Xidhmooyinka Qaranka.

WUXUU GUDDOOMINAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Hadda wixii ka dambeeya maamulka iyo Xannaanada Xidhmooyinka Qaranka (National Park) waxa laga wareejinayaa Wasaaradda Dalxiiska, waxaana loo xilsaarayaa Wasaaradda Xannaanada xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

Qodobka 2aad

Waxaa la farayaa Wasaaradda Dalxiiska iyo Wasaaradda Xannaanada Xolaha Dhirta iyo Daaqa, in ay iyaga oo Iskaashanaaya si wada jir ah sameeyaan una soo diyaariyaan barnaamijkii iyo habkii u suura gelin lahaa Wasaaradda Dalxiska sidii ay si buuxda ugaga faa'ideysan lahayd Xidmooyinka Qaranka (National Park).

Qodobka 3aad

Wax alla wixii qodobbo Sharci amma Xeer ah ee ka soo horjeeda, amma khilaafsan Sharcigan waa la buriyey.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Jenayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

KEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 7 Diseembre 1974, L. 3.
Xubin Guddi Degmo.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1da iyo tii 2da ee Kacaanka 21 Oktoobar, 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 8d iyo kan 10d ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 oo la soo saaray 8dii bisha Junyo 1972;

ASAGOO ARKAY Dekreetada lambr. yahay 1147, taariikh 29 Nofembre 1972 ku saabsan dhismaha Guddiga Degmada Qoryooley;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in Guddiga Kacaanka Degmada uu ka mid noqdo qof ka socda Wakaaladda Horumarinta Beeraha.

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1aad

In idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada uu ka mid noqdo qofka madaxda ka ah Wakaaladda Horumarinta Beeraha ee Degmada Qoryooley.

Qodobka 2aad

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Diseember 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha
Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye Afrax*

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 7 Diseembre 1974, L. 4.
Maamul Tuulooyin.

## MADAXWEYNAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashada koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Qodobka 3d ee Sharciga Lambarkiisu yahay 52, taariikh. 8-6-1972;

ISAGOO ARKAY Xeerka Madaxweynaha G.S.K. ee Lambarkiisu yahay 49, taariikh. 8-2-1973;

MARKII OGAADAY In ay tahay lagama maarmaan in Tuulooyinka halkan hoose ku taxan laga reebo Degmooyinka ay hore uga tirsanaan jireen, si loo daryeelo danaha Bulahada Tuulooyinkaas ku nool;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha kuna saabsan isla Tuulooyinkaas;

### WUXUU XEER KA DHIGAY

### Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda xeerkan lagu naadiyo faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, Tuulooyinka halkan hoose ku taxan waxaa laga soo reebay Degmooyinkii ay hore uga tirsanaan jireen waxana lagu daray maamulka Degmooyinka mid walba horteeda ku qoran:

1. Tuulada la yirahdo Ceeldher oo hore uga tirsanaan jirtay Degmada Sheekh waa laga reebay maamulka Degmadaas waxayna ka tirsanaan doontaa maamulka Degmada Burco;
2. Tuulada la yirahdo Ceeg oo hore uga tirsanaan jirtay Degmada Odweyne waa laga reebay maamulka Degmada waxayna ka tirsanaan doontaa maamulka Degmada Burco;
3. Tuulada la yirahdo Minjacaseeye oo hore uga tirsanaan jirtay maamulka Degmada Berbera waa laga reebay maamulka Degmadaas waxayna ka tirsanaan doontaa maamulka Degmada Sheekh.

### Qodobka 2aad

Guddiyadii Kacaanka ee hore uga dhisnaa Tuulooyinkaas waxay hoos imanayaan Guddiyada Degmooyinka ay imminka ka tirsan yahiin sidaku qoran Lambarada koow, laba iyo seddex ee Qodobka koowad ee Xeerkan.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu naadiyo faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 4aad

Waxaa la baabi'iyay Xeerkii kan qilaafsan ama aan la socon karin

Muqdisho, 7 Diseember 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dowladda ee Arrimaha Gudaha
*S. G. Xupseen Kulmiye Afrax*
*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 106.*
*Muqdisho, 22 Diseembre 1974.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe CABDILLAAHI WARSAME NUUR

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 7 Diseembre 1974, L. 5.**
**Tuuladda Sarmaanyo lagu daro maamulka Degmada Taleex.**

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Qodobka 3aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52, soo baxay 8-6-1972dii; lagu naadiyay Faafinta Rasmiga ah ee 21 Seteembre 1972, dhamaaystirka 1 ilaa L. 9 ee lagu maamulo Dowladda Hoose;

MARKUU ARKAY Xeerka Madaxweynaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 66, soo baxay 23-1-1973kii ee lagu naadiyay Faafinta Rasmiga ah ee 15-7-1973, lambar. 13 bis ee hore loogu dhisay Gobolka Sanaag;

MARKUU ARKAY Xeerka Madaxweynaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 49, soo baxay 8-2-1973dii ee lagu naadiyay Faafinta Rasmiga ah ee 28-2-1973dii dhammaystirka lambar, 3 ilaa L. 2 ee hore loogu dhisay Gobolka Nugaal;

MARKUU ARKAY Inay tahay lagama maarmaan in Tuuladda Sarmaanyo laga reebo maamulka Degmada Ceerigaabo laguna daro kan Degmada Taleex, si loo daryeelo danaha Bulshada Tuulladaas ku nool;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha kuna saabsan isla Tuulladaas.

WUXUU XEERA KA DHIGAY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda Xeerkan lagu naadiyo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, Tuulada Sarmaanyo oo hore uga tirsanaayd maamulka Degmada Cerigaabo, waxay ka tirsanaan doontaa maamulka Degmada Taleex.

Qodobka 2aad

Guddiga Kacaanka ee hore uga dhismaa Tuullada Sarmaanyo wuxuu hoos imanayaa Guddiga Kacaanka Degmada Taleex.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu naadiyo Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 4aad

Isla taariikhda Xeerkani dhaqan galo waxaa la baabi'iyay Xeerkii kan qilaafsan ama aan la socon karin.

Muqdisho, 7 Diseembre 1974.

*S. G. Maxamed Siyaad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye Afrax*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 108.*
*Muqdisho, 22 Diseembre 1974.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe ABDULLAHAI WARSAME NUUR

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
Tr. 7 Diseembre 1974, L. 6.
Maamul Tuulooyin.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Qodobka 3d ee sharciga labarkiisu yahay 52, taariikh 8-6-1972;

ISAGOO ARKAY Xeerka Madaxweynaha G.S.K. ee lambarkiisu yahay 49, taariikh 8-2-1973;

MARKII OGAADAY in ay tahay lagama maarmaan in Tuulooyinka halkan hoos ku taxan laga reebo Degmooyinka ay hore uga tirsanaan jireen, si loo daryeelo danaha Bulshada tuulooyinka ku nool;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha kuna saabsan isla tuulooyinkaas;

WUXUU XEER KA DHIGAY

Qodobka 1aad

Ka bilaabanta taariikhda xeerkan lagu naadiyo faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, Tuulooyinka halkan hoose ku taxan waxaa laga soo reebay Degmooyinka ay hore uga tursanaan jireen waxana lagu daray maafulka Degmooyinka mid walba horteeda ku qoran:

1. Tuulada la yiraahdo Goobaanle oo hore uga tirsanaan jirtay Degmada Bulo Burto waa laga reebay maamulka Degmada B. Burto waxayna ka tirsanaan doonta maamulka Degmada Wanle Weyn;

2. Tuulada la yiraahdo Mubaax oo hore uga tirsanaan jirtay Degmada Buulo Burto waxayna ka tirsanaan doontaa maamulka Degmada Aadan Yabaal.

Qodobka 2aad

Guddiyaddii Kacaanka ee hore uga dhisnaan Tuulooyinkaas waxay hoos imanayaan Guddiyada Degmooyinka ay imminka ka tirsan yahiin sida ku qoran lambarada koow iyo laba ee Qodobka koowaad ee Xeerkan.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu maadiyo faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 4aad

Waxaa la baabi'iyey xeerkii kan qilaafsan ama aan la socon karin.

Muqdisho, 7 Diseembre 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dowladda ee Arrimaha Gudaha
*S. G. Xuseen Kulmiye Afrax*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 107.*
*Muqdisho, 22 Diseembre 1974.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe CABDULLAHI WARSAME NUUR

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 7 Jenayo 1975, L. 7.**
**Billad qalin ah oo Kacaannimo ee la Siiyey G.le Sare Adan Xirsi Warsame.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga Tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Xeerka Tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 19kii Oktoobar 1970, kuna saabsanaa bixinta Billadaha iyo Shahaadooyinka abaalmarinta;

MARKUU EEGAY in hawsha uu qabtay G.le Sare Adan Xirsi Warsame muddadii ahayd afarta sano iyo dheeraadka oo uu ahaa Taliyaha Dugsiga Sare ee Booliska, ay tahay mid ay ka muuqato waddaninimo, kacaanunimo, hawlkarnimo iyo hantiwadaagnimo, ahma mid istaahisha ammaanta Waddanka;

MARKUU GARWAAQSADAY in Gaashaanle Sare Adan Xirsi Warsame uu shaqada ku qabtay si ah isuhurid iyo daacadnimo uuna gaarsiiyey waxbarashada iyo maamulka Dugsiga Sare ee Booliska horumar lagu faani karo, taas oo ay u maragfureyso heerka sare ee tababarka iyo

korriimada maskaxda oo ay gaareen dadkii wax lagu baray Dugsigaas, kuwaas oo si dhab ah loogu beeray fikradooda mabaadi'ida xalaasha ah ee Kacaanka, maantana laga arki karo mirihii laga gaaray, ahna mid ummaadda iyo waddanka u aayayaan;

MARKUU TIXGELIYEY in hawlahaas faanka mudan ee uu qabtay Sarkaalkaasu ay yihiin qaar muujinaya in uu yahay hoggaanshe karti leh iyo sida uu ugu dheggan yahay fulinta waajibaadkiisa, isagoo aan marna ka daalin, islamarahaantaana u beerdhigay afmiishaarka iyo beenlowga. Taasuna ay tahay midda uu weydiisanayo mabda'a. Bulshada cusub ee ah Hantiwadaagga.

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka 1aad

In Gaashaanle Sare Adan Xirsi Warsame oo ah Taliyaha Dugsiga Sare ee Booliska lagu maamuuso Billad Qalin ah oo Kacaannimo, laguna siiyo shaqadaas uu habsamida iyo himilada Kacaannimada Waddanka ugu qabtay daraadeed.

Muqdisho, 7 Jenayo 1975.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. G. Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 23 Diseembre 1974, L. 8.**
**Habka Diiwaan Gelinta Iskaashatooyinka.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAYA QODOBKA 14aad ee Sharciga L. 40 ee 4-10-1973;

ISAGOO Ogsoon baahida loo qabo in si rasmi ahaana loo diiwaan geliyo Iskaashtooyinka Dalka ka aasaamay;

ISAGOO Maqlay talada Xoghayayaasha ku shaqada leh;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

*Arji Diwaan Gelin*

1. Iskaashato kasta waa in la diiwaan geliyaa, sida uu dhigayo sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka ee L. 40, soona baxay 4-10-1973. Diiwaanka waxaa la gelinayaa Iskaashatooyinka cusub iyo kuwa hore u jiri jirayba, iyadoo la raacayo nidaamka hoos ku qoran:

b) Iskaashatooyinka cusub waa inay diiwaan gelin weydiistaan, muddo 30 maalmood dhexdood ah, ka dib markii la dhisay.

t) Iskaashatooyinka hore u jiray intii aanu dhaqan gelin sharciga L. 40 ee 4-10-1973, waa inay diiwaan gelin weydiistaan, muddo 30 beri ah ka dib marka sharcigan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

2. Guddoomiyaha Iskaashatada waa inuu hor dhigaa Guddida Iskaashatooyinka ee Degmooyinka arji diiwaan gelin ah, arjigaas oo ka koobma arrimaha soo socda:

b) Arji codsasho diiwaan gelin ah, kuna qoran xaashida 3da shilin ah.

t) Afar nuqul oo Xeer-Gaarka Iskaashatada ah oo u oggolaaday Shirka Guud ee Iskaashatada, oo ay wada saxeexeen Guddiga Agaasimiddu; Guddoomiyaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada, ama ciddii uu wakiisho, waa inuu goob joog ka noqdo saxeexidda Xeer-Gaarka Iskaashatada, asagoo goob joognimadaas ku muujinaya saxeexiisa iyo shaabadda Xafiiska Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada.

j) War koobkii (minutes) shirka guud ee lagu aasaasay Iskaashatada, kaas oo ay ku cad yihiin magacyadii dadka ka tirsan Iskaashatada ee doorashad ka qayb galay iyo doorashadu sidii ay ku dhammaatay.

x) Liiska dadka Iskaashatada ku jira iyo haddii ay Iskaashatadu beeralay tahay dhulka ay haysataa ee beerani inta uu leeg yahay.

kh) Magacyada dadka loo doortay Guddiyaasha Iskaashatada, sida Guuddiyaha, Guddiga Agaasimidda, Guddida Hantidhawrka xisaabaha.

Qodobka 2aad

*Habka Diiwaan Gelinta*

1. Haddii Xeer-Gaarka, ama beddelaadiisa iyo aasaasidda Iskaashatadu ay waafaqsan yihiin sharciga L. 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka ee soo baxay 4-10-1973, iyo lifaaqa, lana hubiyo in la raacay shu-

ruudaha ku sheegan Qod. 1aad, Guddoomiyaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada, asagoo ra'yigiisa ka dhiibanaaya, ayuu arjiga iyo waraaqaha ku lifaaqan u gudbinayaa Guddiga Iskaashatooyinka ee Gobolka.

2. Guddoomiyaha Guddiga Iskaashatooyinka ee Gobolka, marka uu hubiyo in habka arjiga toosan yahay kuna qoromo sharciga L. 40 ee Iskaashatooyinka, ayuu arjiga iyo waraaqaha ku lifaaqan u gudbinayaa Xoghayaha Dawladda ee Iskaashatada noocaas ah ku shuqul leh, ogeysiinna ka siinaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

3. Xoghayaha Dawladda, isaga oo tixgelinaya talooyinka iyo oggolaanshaha Guddiyada Iskaashatooyinka ee Degmada iyo Gobolka, wuxuu markaa gelinayaa diiwaan rasmi ah oo ay Wasaaraddu ku kaydiso xarunteeda, ka dib markuu baadho in Iskaashatadaasi ay waafaqsan tahay sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka.

4. Haddii diiwaan gelinta la diido, waa in la caddeeyaa sababaha loo diiday. Iskaashatada loo diiday in diiwaan la geliyo waxay xaq u leedahay 30 (Soddon) maalmood gudahooda, marka laga bilaabo maalinta la ogeysiiyey in loo diiday diiwaan gelinta, inay ashkato u qortaan Xoghayaha Dawladda ee ku shuqul leh Iskaashatooyinka noocaas ah. Go'aanka Xoghayuhu arrinta ka gaadhaa waa mid kama dambeyn ah.

### Qodobka 3aad

*Faafinta Diiwaan Gelinta*

1. Marka Iskaashatada la diiwaan geliyo waa in ay Wasaaradda Diiwaan gelinta ku soo qortaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda (Bollettino Ufficiale).

2. Diiwaan gelintu marka ay dhammaato waa inay Wasaaraddu saddex nuqul oo Xeer-Gaarka ah u dirtaa Guddiga Iskaashatooyinka ee Gobolka, kuwaas oo iyana laba nuqul u sii kala gudbinaaya Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada iyo Xarunta Iskaashatada la diiwaan geliyey.

3. Iskaashatada la diiwaan geliyaa waxay yeelanaysaa aqoonsi gaar ah oo sharci marka laga bilaabo maalinta diiwaan gelinteedu ku soo baxdo Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

### Qodobka 4aad

*Iskudar ama gudub Iskaashato*

Haddii laba Iskaashato ay midoobayaan ama Iskaashato ay u gudbayso heer sare oo iskaashi, ama xeer-gaar wax laga beddelayo, Guddoomiyaha Iskaashatadu waa inuu arji u qortaa Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada, arjigaas oo uu ku dalbanaayo in Iskaashatada cusub loo diiwaan geliyo, ama loo oggolaado in Xeer-Gaarka wax laga beddelo, isaga oo fulinaaya shuruudaha sharcigan.

Qododbka 5aad

*Haynta Diiwaanada*

Wasaaradda kasta oo ku shaqo leh Iskaashatooyinka waa inay Xarunteeda ku haysaa Diiwaan Rasmi ah oo lagu qoro Iskaashatooyinka aqoonsiga gaarka ah ee rasmiga ah ku dhisan.

Qododbka 6aad

Xerkani wuxuu burinayaa xeerkii hore L. 117 ee 1-10-1974, iyo wax alla wixii xeer ah ee khilaafsan ama aan la soconin.

Qododbka 7aad

*Dhaqan Galid*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga Ah ee Dawuladda.

Muqdisho, 23 Diseembre 1974.

*S. G. Maxamed Siyaad Barre*

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 29 Diseembre 1974, L. 9.**
**Magacaabid G.le Sare Cabdulahi Maxamuud Xasan Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad tii 2aad ee Kacaanka iyo Sharcigii 1aad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 2 ee Booliska ee soo baxay 23kii Diisembar 1972 kuna saabsan dhismaha Ciidanka Booliska;

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladdii Xoghayaha Arrimaha Gudaha iyo Go'aankii ka soo baxay G.S.K. kuna saabsanaa magacaabid G.le Sare Cabdullahi Maxamuud Xasan Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

WUXUU GUDDOOMIYEY

Xeerka soo socda:

Qododbka 1aad

Laga bilaabo 20kii Diisembar 1974, G.le Sare Cabdullahi Maxamuud Xasan waxaa loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

*Daqan gelid*

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29 Diisembar 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*Jaalle S. G. Jaamac Maxamed Qaalib*
*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 1.*
*Muqdisho, 1 Jenayo 1975.*
G. Dhexe CABDULLAHI WARSAME NUUR

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 1 Agosto 1974, L. 10.**

**Dhul gatay Jaalle Moxamed Sheekh Axmed — ku fadhiya mq. 650, kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Wardhigley.**

**Dhul gatay Jaalle Axmed Dhaahir Xasan ku fadhiya mq. 618,75. Kuna yaal Muqdisho Xaafadda Wardhigley.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 144 taarikhdeeduna ahayd 23 Maajio 1961;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Cali Faarax Muse, taarikhdeeduna ahayd 21-3-1960, uu ku weydiisanayay dhul dhismo Dawladeed kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wardhigley;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyey Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna dhaabacay xaashadda rasmiga ah ee Dawladda;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 8467 bishi 18-8-1961, soona gudubtay fadhigii 272aad ee 5-7-1961;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaned naqshadda dhismaha lamb. 2155 ee 11-3-1974, laguna badalay naqshadda lamb. yhay 8467, soona gudubtay fadhigii 17aad ee 22-3-1974;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 30982 taarikhdeeduna ahayd 28 Oktoobar 1964, in Jaalle Cali Faarax Muse uu dhiibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 2.538, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay 597624 taarikhdeeduna ahayd 15 Set. 1965 in ninka kor ku magacaaban la siiyay dhul ku fadhiya mq. 1.268,75, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wardhigley;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay Xafiiska sixadda L. DH. DW.-1047-74 Taarikhdeeduna ahayd 30-6-1974, oo caddeyneyso dhismaha guriga Moxamuud Sheekh Axmed (Hor. u lahaa Cali Faarax Muuse) oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda hobsinada dhulka ay Xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud oo waafaqsan dhismaha guriga taarikhdeeduna tahay 29-7-1974;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 7104 taarikhdeeduna ahayd 11 Oktoobar 1965, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban, 1.894 Vol. 17 — oo lagu dhigay Notayaha M. J. Mariano oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Cali Faarax Muse oo ka gatay Axmed Dhaahir Xasan dhulka ku yaal Muqdisho — Xaafadda Wardhigley — dhulka la mid ah mq. 1.268,75.

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 358 Rep. taarikhdeeduna ahayd 4-2-1967, oo lagu qoray buuga Canshuurta Dadban L. 92 Vol. 18, oo lagu dhigay Notayaha Dott. Xasan Warsame Cali oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Axmed Dhahir Xasan oo ka gatay Dr. Moxamuud Sheekh Axmed — dhulka ku yaal Muqdisho — Xafadda Wardhigley — dhulka la mid ah mq. 650;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi unuu ka baxay ninka kor ku soo sheegnay;

AMAR XEER

A) Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Dr. Moxamuud Sheekh Axmed la siiyay una gatay dhulka la mid ah mq. 650, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wardhigley;

B) Waxaa la siiyay Jaalle Axmed Dhaahir Xasan dhul Dawladeed ee ku fadhiya mq. 618,75, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wardhigley.

Muqdisho, 1 Agosto 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Moxamed Sheekh Ciismaan*

*VISTO e registrato - Reg. n.1, foglio n. 28.*
*Mogadiscio, li 6 Agosto 1974.*
*Il Sostituto Magistrato ai Conti:*
Jaalle MAXAMED CALI FAARAX

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD
Tr. 10 Nofembre 1974, L.11.

Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Libera Disponibilità) Jaalle Moxamed Saalim Naasir.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lab. 115 soona baxay 13 Setembre 1956;

ISAGA OO ARKAY Arji uu keensaday Moxamed Saalim Naasir markay aheyd 4 maajio 1950, kuna weydiistay dhismo, cad dhul dowladeed, ku yaal Muqdisho — xaafadda Shibis;

ISAGA OO AQOONSAN nqdada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 3-4 soona baxday 15ka Abriil 1957, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 9237, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose, ee Muqdisho, fadhigoodii 168aad taarikhdeeduna 9 Nofembre 1951:

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 7244 oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 9237 lagana aqoonsaday fadhigii 223aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdeeduna markay ahayd 25 Junyo 1958;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 859 taas oo beddeshay midii hore lambarkeedu ahaa 7244 lagana aqoonsaday fadhigii 4aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 11 Abriil 1972;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 643 taas oo beddeshay midii hdro lambarkeedu ahaa 849 lagana aqoonsaday fadhigii 15aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay ahayd 5 Marso 1974, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 216 ee 17-5-1958 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Moxamed Saalim Awlagii uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 2.778,25, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.109,07, loona tiriyay Maxamed Saalim Awlaagi sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 28-6-1961;

ISAGA OO ARKU Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud — Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna aheyd 20-10-1974, taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 643 ee 5-3-1974 laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar — Xafadda Shibis laguna siiyay xaashida lamb. 643 ee 10-3-1974 oo Dowladda Hoose ee Xamar sida caddeyneysa naqshadda guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis. Wuxuu soo saaraya;

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, (Concessione e conseguente libera disponibilità) loona aqoonsaday Maxamed Saalim Awlaagii dhul ku fadhiya mq. 1.109,07, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Shibis.

Muqdisho, 10 Nofembar 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*G. Sare Moxamed Sheekh Ciismaan*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, Foglio n. 40.*
*Mogadiscio, li 18 Novembre 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUUR

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 1 Diseembre 1974, L. 12.**
**Cad dhul Dowladeed, la siiyay Jaalle Maxamed Xaaji Muridi ku yaal Muqdisho — Degmada Wardhigley kuna fadhiya mq. 670,31.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxday 9 Jennayo 1967;

markay ahayd 2 Maajio 1968 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Wardhigley;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Maxamed Xaaji Muridi

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, lamb. 3 soona baxday 15 Abril 1973, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshada lamb. 8631, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 22aad taarikhduna ahayd 26-10-1974, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Boleetada lamb. 180572 ee 19-11-1974 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Maxamed Xaaji Muridi uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 1.005,45, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO ARKAY dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 670,31 Ina tiriyay Maxamed Xaaji Muridi sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 20 Nofembre 1974;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

XEER

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Maxamed Xaaji Muridi, oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhigley kuna fadhiya mq. 670,31.

Muqisho, 1 Diseembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Moxamed Sheekh Ciismaan*

*WAA ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lab. 50.*
*Muqdisho, 7 Dseembre 1974.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDULLAAHI WARSAME NUUR

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 1 Diseembre 1974, L. 13.

Dhul Dowladeed loona gacan geliyay (Concessione di libera disponibilità)

Jaale Cabduraxman Xaaji Murshid — ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan —Kuna fadhiya mq. 600.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqadii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xeerha lamb. yahay 1 ee baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Xeer Dowladeed lamb. 111 ee Reb. taarikhda markay aheyd 15 Settembre 1973, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. L. 23 ee 1-12-1973, taas oo lagu siiyay Jaalle Cabdulraxmaan Xaaji Murshid cad dhul ah ay ujeeddadiisu tahay dhis ku fadhiya mq. 600, kuna yaal Xamar Xaafadda Hodan;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.3656, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 4aad taarikhduna 13-4-1971;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda 1.2870 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 3656 laguna aqoonsaday fadhigii 21aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay aheyd 19-7-1974, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka, taarikhdeeduna aheyd 20-11-1974, taas oo caddeynesa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar L. 2870 ee 7-7-1974 laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osto di Abitabilità) degganaashada guriga ku dhisan Xamar Xafadda Hodan laguna siiyay xaashida lamb. 4417 ee 19 Nofebre 1974 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale wixii waaxii waajib ahaa, kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladdeed (Libera Disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis. Wuxuu soo saaraya;

## X E E R

In loo aqoonsan yahay Jaalle Cabduraxman Xaaji Murshid milkiyada dhulka Dowladeed oo ku fadhiya mq. 600, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hodan.

Muqdisho, 1 Diseembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*G. Sare Moxamed Sheekh Ciismaan*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwanka lamb. 1, boogga lamb. 49.*
*Muqdisho, 7 Diseembre 1974.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAAHI WARSAMA NUUR

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
**Tr. 10 Diseembre 1974, L. 14.**

**Cad dhul Dowladeed, gatay Jaalle Xaaji Yuusuf Cigaal Cali, ku yaal Km. 4. Jidka Afgooye kuna fadhiya mq. 3.330.**

**Cad dhul Dowladeed, la siiyay Impresa Sudano ee Pizzoglio ku yaal Km. 4. kuna fadhiya mq. 843.**

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Xaashaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Koowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer L. 115 taarikhdeeduna ahayd 13 Sett. 1956;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Impresa Sudano ee Pizzoglio taarikhdu markay ahayd 19-9-1959, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Km. 4. Jidka Afgooye;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 10.623, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 261aad taarikhduna ahayd 27-10-1960;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 5693 ee 13 Luliyo 1961, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Impresa Sudano ee Pizzoglio uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 2.500, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 4.176, loono tiriyay Impresa Sudano ee Pizzoglio sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 16 Nofembre 1974;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xukun L. 5 taarikh. 8 Jennayo 1974, lagu diiwaan geliyay Xamar 13-1-1974, L. 37. Buugga 14, waxa cadeyneysa in Jaalle Sudano Pizzoglio ku dhacay Xukun dhuleed laguna wareejiyay Xaaji Yuusuf Cigaal Cali wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cadkaas dhul oo ku fadhiya mq. 3.330, kuna yaal Km. 4., Jidka Afgooye, wuxuu soo saaraya;

## X E E R

B) Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Xaaji Yuusuf Cigaal Cali, oo ku yaal Muqdisho — Km. 4., Jidka Afgooye kuna fadhiya mq. 3.330.

T) Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Sudano Pizzoglio, oo ku yaal Muqdisho — Km. 4., Jidka Afgooye kuna fadhiya mq. 843.

Muqdisho, 10 Diseembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*G. Sare Moxamed Sheekh Ciismaan*

*WAA ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 53.*
*Muqdisho, 16 Diseembre 1974.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe CABDILLAHI WARSAME NUUR

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH.

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dulkii uu soo weydiistay Jaalle Cali Weheliye Siyaad, maalintii 12-8-1973, loona ogolaadal oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka 26 juun uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa afar gees addimihiisuna ahaayeen 20x20 kuna fadhiye 400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadil hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG-3-23-938 ee 22-9-1971, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga. Dhul lamb. 16.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 39.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Muqdisho, 29 Diseembre 1974.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(1) *Maxamed Cabdi Saciid*

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waaxa la caddeynayaa in dulkii uu soo weydiistay Jaalle Muxubba Xasan Cali, maalintii 2-7-1973, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka 26 Juun uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaazkiisu ahaa afar gees addimihiisuna ahaayeen 20x20 kuna fadhiye 400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG-3-23-168 ee 24-3-1974, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 30x20 kuna fadhiya 600 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Kaqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 37.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 42.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 52.

Muqdisho, 29 Diseembre 1974.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(2) *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *BEDDELAAD NAADO DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Caasha Maxamed Warsame, maalintii 14-6-1973, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka 26 Juun uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa afar gees addimihiisuna ahaayeen 20x20 kuna fadhiye 400 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii degmadaas:

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG-3-23-1000 ee 15-10-1973, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 30x20 kuna fadhiya 600 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 30.
Galbeed waxaa ka xga: Dhul lamb. 23.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 25.

Muqdisho, 2 Jennayo 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(3)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Aadan Cabdi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 5-12-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar ah 20x16,50 kuna fadhiya 330 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxa ka xiga: Jid.
Koofur waxa ka xiga: Dhul lamb. 33.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 29.
Bari waxa ka xiga: Dhul lamb. 27.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulkka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guu, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Jennayo 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(4)*

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Diiriye Nuur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 22-7-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 Oktoobar, oo leh qiyaas rektangolaar ah 30x40 kuna fadhiya 1200. mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 200.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 190.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulkka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guu, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Jennayo 1975.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(5)* *Maxamed Cabdi Saciid*